# OhioHealth
# Ogeysiinta Wadajirka ah ee Dhaqamada Arimaha gaarka ah

## Ogeysiintaan waxay sharaxdaa inta warbixinta caafimaadka ah ee adiga kugu saabsan waa la isticmaali karaa iyo la siidaayay iyo sida aad u gali kartid helitaanka warbixintaan. Fadlan u eeg si taxadar ah.

OhioHealth waa nidaamka caafimaadka ee ku jiro isbitaalada, xarumaha caafimaadka, xarumaha caafimaadka bulshada, guriga daryeelka caafimaadka, iyo xirfadlayaal badan oo daryeelka caafimaad. Ogeysiintaan Wada jirka ah ee Dhaqmaada Arimaha gaarka (Ogeysiinta) waxay quseysaa OhioHealth, waa Shaqaalaha Caafimaadka, iyo bixiyayaasha bulshada la xiriirto ee ka qeybqadato diyaarinada daryeelka caafimaad. Waxay quseysaa kaliya adeegyada lagu gaarsiiyo doorkeena sida bixiyaha daryeelka caafimaad, oo ma quseyso shaqooyinka daryeelka caafimaad aan aheyn sida kuwa la xiriiro jirdhisnaanta, wanaaga, hab nololeedka, waxbarashada, badrooniga, tababarka ciyaaraha, iyo adeegyada wacyigelinta.

Bixiyayaasha daryeelkeena caafimaad waxay ka wada shaqeeyaan inay siiyaan daryeel tayo leh bukaanadeena. Sida sharciga ogolaaday, warbixinta caafimaadka waxaa loo wadaagaa sida muhiimka ah ee lagu sameynayo daaweynta, lacag bixinta iyo shaqooyinka daryeelka caafimaad. Ujeedada Ogeysiintaan waa u sheegida sida aan u wadaagno warbixinta iyo sida aad wax badan uga ogaan kartid dhaqamada warbixin wadaagida.

Waxaad u heli kartaa Ogeysiintaan xili hore ee booqashada isbitaalka, ama waxaa laga yaabaa inaad ku heshid goobta booqashadaada marka aad tagtid. Ogolaanshaha qaabka daaweynta ee booqashadaan, waxaa lagu weydiinayaa inaad ogaatid helitaanka Ogeysiintaan Dhaqamada Arimaha gaarka.

**I. Waxaan Leenahay Waajibaad sharci ah ee Lagu Illaalinayo Warbixintaada Caafimaad.** Waxaa nalooga baahanyahay sharci ahaan inaan joogteyno arimaha gaarka ah ee warbixinta caafimaadkaaga oo illaalsan iyo si ay kuu siiso ogeysiinta waajibaadyadeena sharciga iyo dhaqamo walba. Waxaa nalooga baahanyahay in lagu ogeysiiyo dhacdada lama lamfilaanka ah ee ku xadgudubka warbixinta caafimaadkaaga illaalsan. Waxaa nalooga baahanyahay inaan u hogaansanaano xeerarka Ogeysiintaan hadiiba ay shaqeyso. Waxaan leenahay xaquuqda lagu badelayo xeerarka Ogeysiintaan sida muhiimka ah iyo si loo sameeyo ogeysiin cusube oo u bilaabaneyso dhammaan warbixinta caafimaadka illaalsan ee inaga aan hayno. Waxaad heli kartaa koobiga ogeysiin walboo la badelay ee waaxda diiwaanka xaruntaan ama koobiga waxaa laga heli karaa iyada oo lagala xiriirayo Sarkaalka Arimaha gaarka OhioHealth. Fiiri warbixinta xiriirka ee Qeybta VIII ee Ogeysiintaan.

**II. Waxaan Isticmaali karnaa oo Siideyn Karnaa (Wadaagnaa) Warbixintaada Caafimaadka Illaalsan.**

1. **Ogolaanshahaaga**. Markii laga reebo sida lagu tilmaamay Ogeysiintaan, ma isticmaaleyno iyo/ama siideyneyno warbixinta caafimaadkaaga illaalsan oo ujeedo walba illaa aad saxiixdo foomka ogolaanayo isticmaalka iyo/ama siideynta. Waxaad xaq u leedahay inaad uga laabatid ogolaanshahaas qoraal ahaan illaa aan ka qaadnay wax tallaabo ah ee ku tiirsan ogolaanshaha. Waxaa jiro isticmaalayaal qaarkood iyo siideynada warbixintaada caafimaadka illaalsan ee aan mar walba helno ka hor ogolaanshaha iyo kuwaan waxaa ku jiro:

- **Xiriirarada Suuqgeynta** (illaa xiriirka laguugu sameeyo si toos ah qof ahaan, si sahlan ayay u tahay hadiyada dhiirogelinta ee qiyamka magacaabida, waa xasuusinta qoraalka dhaqtarka dib u buuxinta, warbixinta caafimaadka guud iyo fayo qabka, ama xiriirka ku saabsan waxyaabaha la xiriiro caafimaadka ama adeegyada aan bixino ama si toos ah ula xiriirto daaweyntaada).
- **Inta badan way iibiyaan warbixinta caafimaadkaaga** (illaa daaweyn ahaan ama ujeedo lacag bixin ama sida sharciga u baahanyahay).
- **Inta badan waxay isticmaalaan oo siidaayaan qoraalada cilmi nafsiga** (illaa haddii kale sharciga u ogolaado ama u baahanyahay).

2. **Daaweynta**. Waxaa laga yaabaa inaan isticmaalno oo siideyno warbixinta caafimaadkaaga ilaalsan sida muhiimka u ah daaweyntaada. Tusaale ahaan:

   - Dhaqaatiirta iyo kalkaalisooyinka iyo xirfadlayaasha kale ee ku lugleh daryeelkaaga waxay isticmaalayaan warbixinta ku jirto diiwaanka caafimaadkaaga iyo warbixinta aad ka sheegtay aastaamahaaga iyo falcelinada si laguugu qorsheeyo koorso daaweyn oo ku jirto nidaamyada, daaweynada, baaritaano, iwm.
   - Waxaan u siideyn karnaa warbixinta caafimaadkaaga illaalsan xarun kaloo daryeel caafimaad ama xirfadle ee aanan naga mid aheyn, laakin waa kuma ama ku siinayo daaweyn adiga. Tusaale ahaan, haddii kadib markaad ka tagtid isbitaalka, waxaad heleysaa daryeelka caafimaadka guriga, waxaan u siideyn karnaa warbixinta daryeelkaaga caafimaad hay'adaas daryeelka caafimaadka guriga si markaas qorshaha daryeelka adiga laguugu diyaarin karo.
   - Haddii lagaa daaweeyay dhaawaca jilibka, waxaan la wadaagi karnaa warbixintaada shaqaalaha daaweynta jirka si markaas ay ugu caawiso qorsheynta howshaada.

3. **Lacag bixinta Daaweyntaada.** Waxaan isticmaali karnaa oo siideyn karnaa warbixin caafimaadkaaga illaalsan sida muhiimka u ah ujeedada lacag bixinta ee xirfadlayaashaas caafimaad iyo xarumaha ku daaweeyay ama ku siiyay adeegyada. Tusaale ahaan, waxaan u gudbin karnaa warbixin la xiriirto nidaayadaada caafimaad iyo daaweynta ee caymiskaaga caafimaad si loo diyaariyo lacag bixinta adeegyada lagu siiyay, ama waxaan isticmaali karnaa warbixintaada inay diyaariso biilka adiga laguu soo dirayo ama qofka masuulka ka ah lacag bixintaada.

4. **Shaqooyinka Daryeelka Caafimaad**. Waxaan isticmaali karnaa oo aan siideyn karnaa warbixinta caafimaadkaaga illaalsan sida muhiimka u ah, iyo sida sharciga ogolyahay, ee shaqooyinkeena daryeelka caafimaadka oo ay ku jirto hormarinta xarunta caafimaadka, qiimeynta xirfadlaha, maamulida ganacsiga, aqoonsashada iyo shatiyeynta, iwm. Tusaale ahaan:

   - Waxaan isticmaali karnaa oo siideyn karnaa warbixinta caafimaadkaaga illaalsan oo ujeedada lagu hormarinayo daaweynta caafimaadka iyo daryeelida bukaanadeena.
   - Waxaan isticmaali karnaa oo aan siideyn karnaa warbixinta caafimaadkaaga illaalsan iyo kuwa midka ah xarumaheena daryeelka caafimaadka ee maga midka ah iyo xubnaha diyaarinta daryeelka caafimaad diyaarsan ee shaqooyinkeena daryeelka caafimaad iyo kuwa diyaarinta daryeelka caafimaadka diyaarsan.
   - Waxaan sidoo kale siideyn karnaa warbixinta caafimaadkaaga illaalsan ee xarun kale ee daryeelka caafimaad, xirfadlayaasha daryeelka caafimaad, ama qorshaha caafimaad ee waxyaabo noocaas ah sida hubinta tayada iyo maamulida dacwada, laakin kaliya haddii xaruntaas, xirfadlaha, ama qorshaha sidoo kale kula leeyahay ama kula lahaa xiriir adiga.

5. **Cilmi baarista**. Xaaladaha xadidan, waxaan isticmaali karnaa oo aan u siideyn karna warbixinta caafimaadkaaga ujeedooyinka cilmi baarista. Tusaale ahaan:

    - Hay'ada cilmi baarista waxay rabi kartaa inay is barbardhigto natiijooyinka dhammaan bukaanada helay daawada gaarka ah iyo waxay u baahaneysaa in laga eego halista diiwaanada caafimaadka.
    - Dhammaan xaaladaha halka ogolaanshahaaga gaarka ah aanan laga helin, arimahaaga gaarka ah waxaa lagu illaalinayaa sharuudaha qarsoodiga adag ee ay quseyso Hay'ada Guddiga Eegida ama guddiga arimaha gaarka ah oo kormeero cilmi baarista ama matalaada cilmi baarayaasha xadeeyo isticmaalkooda iyo siideynta warbixinta bukaanka.

6. **Balamaha iyo Adeegyada**. Waan kula soo xiriiri karnaa si aan kuu siino xasuusaha balanta ama tijaabino natiijooyinka ama adeegyada kale. Waxaad leedahay xaquuqa qaarkood ee la xiriiro xiriiradaan, sida lagu sharaxay Qeybta VI.

7. **Ururka Ganacsiga**. Qeybaha qaarkood ee adeegyadena waxaa bixiyo dad banaanka ah ama hay'ado ee aan heshiis la galno, sida hanti dhowrka, aqoonsashada, adeegyada sharciga, iwm. Waqtiyada waxay noqon kartaa mid muhiim noo ah inaan siino warbixin caafimaadkaaga illaalsan mid ama kuwa badan ee dadka banaanka ah ama hay'adaha na caawiyo. Dhammaan xaaladaha, waxaan u baahannahay ururadaan ganacsi ee si markaas si badbaado ah loogu illaaliyo arimaha gaarka ah ee warbixintaada.

8. **Isticmaalada kale iyo Siideynta**. Waxaan naloo ogolyahay ama nala rabaa sharci ahaan inay sameyno isticmaalo kale ama siideynada warbixinta caafimaadkaaga illaalsan iyada oo aan jirin ogolaanshahaaga ama ansixinta.

    - Waxaan u siideyn karnaa warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan ujeedo walba ee sharci ahaan loogu baahanyahay;
    - Waxaan u siideyn karnaa warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan howlaha caafimaadka bulshada, sida loogu baahanyahay wargelinta cudurka, dhaawaca, dhalashada iyo dhimashada, iyo baaritaanada caafimaadka bulshada loo baahanyahay;
    - Waxaa laga yaabaa inaan siideyno warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan sida sharci ahaan loogu baahanyahay haddii aan ka shakino xadgudubka carruurta ama dayacaada iyo sida loogu baahanyahay sharci ahaan haddii aan aaminsannahay inaad tahay dhibane xadgdudb, dayacaad, ama rabshada qoyska;
    - Waxaa laga yaabaa inaan u siideyno diiwaanada tallaalka dugsiga ardayda laakin kaliya haddii waaladiinta ama masuulada (ama ardayga haddii uusan aheyn mid yar) ku ogolaado midkood hadal ahaan ama qoraal ahaan;
    - Waxaan u siideyn karnaa warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan Maamulka Cuntada iyo Daawada haddii ay muhiim tahay in la soo wargeliyo dhacdooyinka hore, waxyaabaha ciladaha, ama si looga qeybqaato badeecada dib u soo celinta;
    - Waxaan u siideyn karnaa warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan badroonigaaga markii aan ku siino daryeelka caafimaadka oo codsiga badroonigaaga ah si uu u ogaansado jirada goobta shaqada la xiriirto ama dhaawada, iyo dacwadaha ugu muhiimka ah, waxaad heleysaa ogeysiinta in warbixinta loo sii daayo badroonigaaga;
    - Waxaa laga yaabaa inaan siideyno warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan haddii sharciga u baahdo ee hay'ada kormeerida dowlada ee sameyneyso xisaab hubinta, baaritaanada, ama dacwdaaha rayidka ama dambiga;

- Waxaa laga yaabaa inaan siideyno warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan haddii loo baahanyahay inaad sidaas ku sameysid amarka maxkamada ama ogaanshaha codsiga, iyo xaaladaha qaarkood, waxaad ogaaneysaa siideyn noocaas ah;
- Waxaan u siideyn karnaa warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan si ay kuugu ogolaato saraakiisha fullinta sharciga sida sharciga ugu baahanyahay ee loo wargeliyo dhaawacyada iyo dhaawacyada iyo dambiyada;
- Waxaan su iideyn karnaa warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan baarayaasha iyo/ama agaasimayaasha tacsida ee waafaqsan sharciga;
- Waxaan u siideyn karnaa warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan haddii ay muhiim u tahay diyaarinta ku deeqida xubin ama unug ee adiga kaa imaanayo ama kugu beerayo;
- Waxaan u siideyn karnaa warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan ujeedooyinka cilmi baarista qaarkood markii cilmi baaris noocaas ah ay ansixiyaan hay'adaha guddiga dib u eegida iyo sharciyo aasaasan ee lagu hubinayo arimaha gaarka ah;
- Waxaan su iideyn karnaa warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan xaalada kooban haddii aan ka shakino halis dhab ah ee caafimaadka ama badbaadada;
- Waxaan u siideyn karnaa warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan haddii aad tahay xubinta milatariga sida loogu baahanyahay adeegyada ciidadamada, iyo sidoo kale haddii ay muhiim u tahay amniga qaranka ama howlaha sirdoonka; iyo
- Wxaan u siideyn karnaa warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan hay'adaha magdhowga shaqaalaha haddii ay muhiim u tahay go'aaminta faa'idada magdhowga shaqaalaha.

## III. Diyaarinta Daryeelka Caafimaadka La diyaariyay

Ka qeybqaatayaasha OhioHealth oo hal ama ka badan oo diyaarinada daryeelka caafimaadka diyaarsan (OHCA) iyo bixiyayaasha kale ee bulshada, sida isbitaalada iyo dhaqamada dhaqaatiirta, ee isticmaalo nidaamka diiwaanka caafimaad ee Epic. Ka qeybqaadashada ee OHCA, waxaa laga yaabaa inaan helno warbixinta ku saabsan korontadaada ee bixiyayaayaasha OHCA ee kale oo ka qeybqaadanayo oo waxaan sameynaa warbixin ku saabsan diyaar ahaanshahaaga ee bixiyayaasha ka qeybqaadanayo. Waxaan u baahannahay bixiyayaasha kale ee ka qeybqaadanayo waxay isticmaalaan warbixintaada ay adiga kugu daaweeyaan, xiriiriyaan daryeelkaaga, raadiyaan lacag bixinta daryeelkaaga iyo shaqooyinka daryeelka caafimaadka (sida qiimeynta iyo hormarinta tayada daryeelka OHCA ee bixiyayaasha ka qeybqaadaneyso).

Bixiyayaasha ka qeybqaadanayo OHCA waa hay'ado madax banaan iyo ma jiraan bixiye ka qeybqaadanayo waa shaqaale, wakiil, jaal ama howlgal wadajir ah oo bixiye kale oo ka qeybqaadanayo (marka laga reebo xaaladaha xadidan markii bixiye ka qeybgalayo uu la galo heshiis gaar ah bixiyaha kale ee ka qeybqaadanayo). Bixiye walba wuxuu si gooni ah u qaadayaa tallaabooyinka muhiimka u ah in looga qeybqaato OHCA oo wadaago warbixinta bukaanka ee daaweynta iyo ujeedooyinka kale ee sharci ahaan loo ogolyahay.

## IV. Isdhaafsiga Warbixinta Caafimaadka

Warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan waxaa loo siideyn karaa Isdhaafsiga Warbixinta Caafimaadka si loo fududeeyo bixinta daryeelka caafimaadka. Isdhaafsiga Warbixinta Caafimaadka la ansixiyay waxaa laga rabaa inay joogteyso maamul ku haboon, jirka, iyo illaalada farsamada si loo illaaliyo arimaha gaarka iyo amniga warbixinta caafimaadka illaalsan. Kaliya shaqsiyaadka la ansixiyay waxay ka gali karaan oo isticmaali karaan warbixinta caafimaadka illaalsan ee ka imaanaya isdhaafsiga

warbixinta caafimaadka la ansixiyay. Waxaad leedahay xaquuqaha qaarkood ee la xiriiro siideyntaan, sida lagu tilmaamay Qeybtaan V hoose.

## V. Waxaad leedahay Fursada Lagu diidayo ("Looga Baxayo") Isticmaalada Xiggo iyo Siideynada:

1. **Jaheynta Xarunteena**. Waxaan joogteynaa jaheynta xarunta ee qoreyso magacaaga, goobta ama lambarka qolka, xaalada guud iyo, haddii aad rabtid, ka mid ahaanshahaaga diinta. Illaa aad ka dooratid inaad ku heshid warbixintaada in laga reebo jaheyntaan, warbixinta, markii laga reebo ka mid ahaanshahaaga diinta, waxaa loo siideynayaa qof walba oo codsadaa isaga oo kugu weydiinayo magac ahaan. Warbixintaan, markii lagu daro ka mid ahaanshahaaga diinta,waxaa sidoo kale la siin karaa xubnaha maamulka kaniisada. Waxaad leedahay xaq inta lagu jiro diiwaangelinta ee lagu helayo warbixintaada in looga reebo jaheyntaan iyo sidoo kale si macquul ah loogu diido warbixinta la siiyay iyo/ama cida la siiyay.

2. **Qoyska iyo Saaxibada Ku lugleh Daryeelkaaga**. Oo ay la jirto ogolaanshahaaga, waxaa laga yaabaa inaan u siideyno waqti ku waqti warbixinta caafimaadka, saaxibada, iyo kuwa kale ee ku lugleh daryeelkaaga ama lacag bixinta daryeelkaagasi markaas loo fududeeyo in ka qeybgalka qofkaas ee daryeelidaada ee adiga ama bixinta daryeelkaaga. haddii aadan awoodin, ugu dan karin, ama wajahayo xaalada caafimaadka degdega oo waxaan go'aansanaa in siideynta xadeysan laga yaabo inay tahay danahaaga ugu wanaagsan, waxaan la wadaagi karnaa warbixinta caafimaadka oo xadidan shaqsiyaadka noocaas ah ogolaanshahaaga la'aantiisa. Waxaan sidoo kale u siideyn karnaa warbixinta caafimaadka illaalsan hay'ada bulshada iyo gaarka ah ee ansixisaa si ay u caawiso dadaalada lagu xalinayo masiibada si markaas in hay'ada u raadiso xubinta qoyska ama dadka kale ee laga yaabo inay ku lugleeyihiin qaar ka mid ah qeybaha daryeelkaaga.

3. **Lacag aruurinta.** Waxaan kuula soo xiriiri karnaa inaan ku deeqno dadaalada lacag aruurinta oo matalaadeena ah. Waxaad xaq u leedahay inaad "ka baxdid" ee helida qoraalada lacag aruurinta/xiriirka oo waxay sidaaas u sameyn kartaa udirista magacaaga iyo ciwaanka Aasaaska OhioHealth, 3430 OhioHealth Parkway, Columbus, Ohio 43202 ama i-meel ahaan **OptOut_OHF@OhioHealth.com** iyo bayaanka aadan rabin inaad ka heshid qoraalada lacag aruurinta ama xiriirada inaga naga imaanayo.

4. **Isdhaafsiga Warbixinta Caafimaadka**. Iyo ixtiraamka Sidhaafsiga Warbixinta Caafimaadka, adiga ama matalaadaada shaqsiga waxay leeyihiin xaquuqda loogu codsanayo qoraal ahaan in aan sameyno midkood ama labadaba ee kuwa xiggo: (a) ha siideyn wax walba ee warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan ee Isdhaafsiga Warbixinta Caafimaadka la ansixiyay; (b) looma siideynin qeybo gaar ah ee warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan ee Isdhaafsiga Warbixinta Caafimaadka la ansixiyay. Falcelino walba ee siideynta warbixinta caafimaadka illaalsan ee aad ku codsatay sida waafaqsan (a) ama (b) ka sareeyo waxay sababi kartaa bixiyaha daryeelka caafimaad ee aanan helin gelitaanka warbixinta muhiimka u ah bixiyaha si loogu abaalgudo daryeelka ku haboon ee adiga ah. Waa inaan sharafnaa xadeyno walba ee siideynta warbixin caafimaadka illaalsan ee aad codsatay sida waafaqsan (a) ama (b) ka sareeyo sida waafaqsan sharuudaha sharciga jiray. Waxaa laga yaabaa inaad sameysid codsi qoraal ah adiga oo la xiriirayo Waaxda Diiwaanada Caafimaadka ee xaruntaan.

## VI. Xaquuqahaaga La xiriiro Warbixintaada Caafimaad.

1. **Gelitaanka ee warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan**. Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyeysid iyo/ama baartid kuwa badan ee warbixinta caafimaadka ee aan ku ceshano matalaadaada.

   - Dhammaan codsiyada gelitaanka waa in qoraal ahaan lagu sameeyaa oo aad adiga saxiixdid ama wakiilkaaga. Haddii uu jirto qarash horay ayaan kuugu sheegeynaa.
   - Waxaan sidoo kale ku dlalaceynaa boostada haddii aad codsatid koobiga lka soo diray oo waxaan ku dalaceynaa diyaarinta dulmarka warbixinta la codsday haddii aad codsatid dulmar noocaas ah. Waxaad heli kartaa gelitaanka foomka codsiga ee ka imaanayo Waaxda Diiwaanada Caafimaadka ee xaruntaan.
   - Waxaad xaq u leedahay inaad heshid koobi koronto ah ee warbixintaada caafimaadka ee ku jirto qaabka korontada oo waxaad ku aadin kartaa in koobiga si toos ah loogu gudbiyay hay'ada ama qofka aad u xilsaartay, lagu siiyay in u xilsaarid noocaas ah ay cadahay, la arki karo, iyo gaar u ah magaca buuxo iyo ciwaanka dirista ama warbixinta kale ee aqoonsaneyso.
   - Waxaan kugu dalaci karnaa qidmada shaqadeena iyo saadadka lagu diyaarinayo koobigaaga ee warbixinta caafimaadka korontada ah.

2. **Isbadelada Warbixinta Caafimaadkaaga Illlaalsan**. Haddii aad aaminsantahay inuu qalad ka jiro warbixinta caafimaadkaaga ama aaminsantahay in warbixinta u baahantahay in la badelo si markaas loo saxnaado, waxaad xaq u leedahay inaad ku codsatid qoraal ahaan in aan badelno ama saxno warbixinta caafimaadkaaga.

   - Waajib naguma ahan inaadbadelno dhammaan codsiyada laakin waxaan siineynaa codsi walba tixgelin taxadar leh.
   - Dhammaan codsiyada badelka, si markaas aan u tixgelino inaga, waa inay qoraal ahaataa, ay ku saxiixanyihiin adiga ama wakiilkaaga, iyo waa inay sheegtaa sababaha codsiga badelka/saxida.
   - Haddii badelka ama saxida aad codsatid inaga aan sameyno, waxaan sidoo kale ogeysiineynaa dadka kale ee nala shaqeeyo oo yeelano koobiyada diiwaanka aan saxneyn haddii aan aaminsannahay in ogeysiin noocaas ah ay muhiim tahay.
   - Waxaad ka heli kartaa foomka codsiga badelka ee ka imaanayo Waaxda Diiwaanada Caafimaadka xarunta.

3. **Xisaabinta Siideynta Warbixinta Caafimaadkaaga Illlaalsan**. Waxaad xaq u leedahay inaad heshid xisaabinta siideynada qaarkood ee inaga aan sameynay ee Warbixinta Caafimaadkaaga Illlaalsan. Xaquuqdaan ma quseyso siideynta loo sameeyay ujeedooyinka daaweynta, lacag bixinta ama shaqooyinka daryeelka caafimaadka.

   - Codsiyada waa in lagu sameeyaa qoraal ahaan oo uu saxiixaa adiga ama wakiilkaaga.
   - Foomamka codsiga xisaabinta waa in laga helaa Waaxyada diiwaanada Caafimaadka ee xaruntaan.
   - Xisaabinta ugu horeyso ee muddada 12-bilood ee walba waa bilaash; waxaa laguugu soo dalici karaa qidamada xisaabinta isku xigto ee aad ku codsatid gudaha muddada 12-bilood.
   - Xisaabinada waxay ku xadidnaaneysaa lix sanno ka hor taariiqda codsiga.

4. **Xadeynada Isticmaalka iyo Siideynta Warbixinta Caafimaadkaaga Illlaalsan**. Waxaad xaq u leedahay inaad codsatid xadeynada sida aan u isticmaalno oo aan u siideyno warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan ee daaweynta, lacag bixinyta, ama shaqooyinka daryeelka caafimaad.

- Waxaad xadeyn kartaa isticmaalada naloogu ogolyahay sharci ahaan.
- Foomka codsiga xadeynta waxaa laga heli karaa Waaxda Diiwaanada Caafimaadka xaruntaan.
- Xaalada inta ugu badan, nala kama rabo inaan ogolaano codsiga xadeynta, laakin waxaan isku dayayaa inay hoy siiyo codsiyo macquul ah marka ay ku haboontahay.
- Waxaan haysanaa xaquuqda lagu soo afjarayo xadeynta lagu heshiiyay haddii aan aaminsannahay in soo afjarida ay ku haboontahay. Dhacdadaas, waan ku soo ogeysiineynaa.
- Waxaad sidoo kale haysataa xaquuqda lagu soo afjarayo xadeynta walboo lagu heshiisay iyada oo la soo dirayo ogeysiin qoran, aad adiga saxiixday ama wakiilkaaga, Waaxda Diiwaanada Caafimaadka xaruntaan.
- Haddii aad bixisid biilka oo dhan ee adeega nafsadaada, jeebka laga bixiyay, oo na weydii inaan u dirin warbixinta ku saabsan adeeg gaar ah ee caymiskaaga ee lacag bixinta, waxaan sharafeynaa codsigaan haddiiba warbixinta aanan loo baahneyn inay sharaxdo adeegyada kale ee caymiskaaga loo dirayo.

5. **Xiriirada Qarsoodiga ah**. Waxaad xaq u leedahay inaad codsatid oo inaga waxaan kaa qaabileynaa codsiyada macquulka ah adiga ama wakiilkaaga si aad u heshid xiriirada la xiriiro warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan ee inaga naga imaaneyso ee qaababka kale ama goobaha kale. Tusaale ahaan, haddii aad rabtid in xasuusinta balantaas aanan cod lagu reebin ama in lagu soo diro ciwaan gaar ah, waan qaabileynaa codsiyada macquulka ah. Waxaad codsan kartaa xiriirada qarsoodiga qaarkood oo qoraal ahaan iyo waxaa lagu diri karaa codsigaaga Waaxda Diiwaanada Caafimaadka xaruntaan.

6. **koobiga Warqada.** Waxaad xaq u leedahay xaquuqda lagu helayo koobiga warqada ee Ogeysiintaan, xittaa haddii aad ku codsatid koobi noocaas i-meel ahaan ama qaabab kale oo koronto ah.

**VII. Ogeysiinta Siideynada Aan la ogolaanin**. Dhacdada aan la filaneyn ee ah in la jibiyay warbixinta caafimaadkaaga illlaalsan, waxaad heleysaa ogeysiinta iyo warbixinta ee talaabooyinka laga yaabo inaad qaadid si aad uga illaaliso nafsadaada waxyeelo.

**VIII. Su'aalaha iyo Cabshooyinka.** Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama u baahantahay caawin dheeraad ah ee la xiriirto Ogeysiintaan, waxaad kala xiriiri kartaa Sarkaalka Arimaha gaarka ah ee OhioHealth 3430 OhioHealth Parkway, Columbus, Ohio 43202 ama soo wac 1-866-411-6181. Haddii aad aaminsantahay in xaquuqdaada arimaha gaarka ah in lagu xadgudbay ama aad ku diiday go'aanka aan sameynay ee ku saabsan gelitaanka warbixinta caafimaadkaaga, waxaad la xiriiri kartaa:

- Sarkaalka Arimaha gaarka OhioHealth, ama
- Xoghayaha Waaxda caafimaadka iyo Adeegyada Iinsaanka Mareykanka ee Washington D.C. oo qoraal ahaan gudaha 180 maalmood ee xadgudubka xaquuqdaada.
- Ma jirayaan wax aargoosi ah ee xareynta cabashada.

**IX. Taariiqda Bilowga**. Ogeysiinta Wadajirka ah ee Dhaqamada Arimaha gaarka ah waxay bilaabaneysaa Juun 1, 2017.